

HUMAN RIGHTS WATCH

# "Sida Kalluun ku jira Biyo Sumeysan"

## Weerarrada ka dhanka ah xorriyadda warbaahinta Soomaaliya

# “Sida Kalluun ku jira Biyo Sumeysan”

## Weerarrada ka dhanka ah xorriyadda warbaahinta Soomaaliya

# Soo koobid guud

> "Hay'adaha dawlada, bulshada iyo maleeshiyaadka dhammaantood cadaw ayey nagu yihiin. Waxaannu nahay sida kalluun ku jira biyo sumeysan, markastaa waa nala weerarri karaa ama nala dili karaa."
>
> **- Weriye ka howlgala Gaalkacyo ayaa sidaa yiri, Febraayo 2015**

12-kii Oktoobar, 2014, Cabdirisaaq Jaamac Cilmi oo ku magac dheer Black ahaana weriye rug-caddaa ah oo u shaqeeya telefishinka gaarka loo leeyahay ee Somali Channel, ayaa waxa uu ku sugnaa bannaanka gurgiisa ku yaalla Muqdisho. Ka dib waxaa rasaas ku furay nin gaari watay. "Waxaan isku dayay inaan cararo, balse ninka ayaa rasaas oodda iiga qaaday, waxaana dareemay sida ayadoo ay toban jeer dhabarka iiga dhacday," ayuu yiri Cabdirisaaq. "Waxaan maqlayay dhowr cod oo u sheegaya ninka wax tooganayay in uu shiiska toosiyo. Waxaan maqlayay iyagoo leh, "Weli waa uu nool yahay!"

Rasaastaasi ayaa gacanta iyo dhowr meelood oo dhabarka ah uga dhacday Cabdirisaaq. Waxaa uu cisbitaalka ku jiray afar bilood, welina wuxuu todobaad kasta qaataa dawooyin. Dhaawacaasi awgii, Cabdirisaaq ma gudan karo howlihiisa weriyannimo.

Weerarkaasi ka dib, saraakiisha dowladda oo uu ka mid yahay madaxa Hay'adda Nabad Suggida iyo Sirdoonka Qaranka (NISA) ayaa ballanqaaday in ay la xisaabtamayaan kuwii weerarka geystay. Balse Cabdirisaaq ayaa sheegay in ilaa iyo hadda aanay jirin cid wareysatay ama uu warbixin ka siiyay sida uu u dhacay weerarkii loo geystay. Waxa uu ku noolyahay cabsi. "Weli waa ay noolyihiin kuwii i weerraray, waa ay i garanayaan, balse anigu ma garanayo." ayuu yiri Cabdirisaaq.

Sanadkii 2015, Gudiga Difaaca Weriyayaasha (CPJ) ee xaruntiisu tahay New York, ayaa Soomaaliya ka dhigay dalka koowaad ee dalalka aan baaritaanka lagu sameyn dilalka loo geysto weriyayaasha.

Tan iyo 2014, 10 weriyaye ayaa la dilay; afar waxaa muuqata in weerar lala eegtay, lixna waxaa ay ka badbaadeen iskuday khaarijin, halka saddexna la dhaawacay iyagoo warar tebinaya. Tobaneeyo ayaa taleefannada looga goodiyay ama waxaaba loo soo diray

farriimo uga digaya in ay bedelaan habka ay wax u tebiyaan ama ay wajahaan cawaaqibka ka dhasha. Inkastoo dowladda Soomaaliya ay inta badan ballanqaado wax ka qabashada kuwa mas'uulka ka ah weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha, haddana isla xisaabtanka ayaa ah mid aad u kooban oo aan sinnayn. Tusaale ahaan, hal kiis oo keliya ayaa loo maxkamadeeyay dilalka weriyayaasha loo geystay tan iyo 2014-kii.

Weriyayaasha ka howlgala koofurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo Puntland ayaa u sheegay Human Rights Watch, in labadii sano ee la soo dhaafay ay dhammaan dhinacyada isku haya colaadda Soomaaliya khatar geliyeen xorriyadda warbaahinta. Ayadoo Soomaaliya ay dhammaadka 2016-ka isu diyaarineyso hannaan doorasho (oo aan qof iyo codkiisa ku dhisnayn), ayaa hanjabaadaha iyo weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha waxa ay wiiqayaan xaqa ay shacabka Soomaaliya u leeyihiin helitaanka macluumaadka asaasiga ah ee saxda ah, waxaana hay'adaha warbaahintu faafreebaan wararkooda si ay usii jiraan.

Warbixintan ayaa diiradda lagu saaray tacaddiyada ay dowladda iyo kooxaha aan dowladiga ahayn u geystaan weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, kuwaas oo dhacay tan iyo sanadkii 2014-ka. Waxa ay ku salaysan tahay in ka badan 50 wareysi oo lala yeeshay weriyayaal ka shaqeeya koofurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo Puntland oo ah maamul goboleed ku yaalla waqooyi bari Soomaaliya. Marka laga soo tago dilalka, isku dayadda khaarajinta, iyo hanjabaadaha noocyada badan leh, warbixinta ayaa sidoo kale diiwaangelisay sida ay weriyayaasha ku sugan maamul goboleedyada cusub ee kumeelgaarka ah iyo Puntland ay u wajahayaan caqabado cusub oo wiiqaya tebinta wararkooda.

Labadii sano ee lasoo dhaafay, Soomaaliya ayaa wajahday xilli kale oo ay aad sare u kaceen ammaan darrida iyo xasilooni la'aanta siyaasadda, tan iyo wixii ka dambeeyay burburkii dalka ee 1991-kii. Siyaasad ahaan, inta badan dareenka dowladda Federaalka ah, maamul goboleedyada, deeq bixiyayaasha iyo weliba howlwadaagayaasha gobolka, ayaa diiradda lagu saarayay sameynta nidaam Federaali ah oo ay Soomaaliya yeelato, ayadoo la sameeyay maamul goboleedyo kumeelgaar ah. Arrintan ayaa loo arkay mid shardi u ah marxaladda kala guurka siyaasadeed iyo soo xulidda xildhibaannada iyo dowladda cusub ee dhammaadka 2016-ka.

Waqtiyada kama dambeysta ah ee loo qabtay sameynta maamul goboleedyada Federaalka, hannaanka doorasho ee 2016-ka iyo weliba dagaalka uu ururka Al-Shabaab ka wado qeyba badan oo ka mid ah koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, ayaa waxay sare u qaadeen muhiimada ah in la helo warar sugan iyo in dhinacyadu ay xakameeyaan wararka siyaasadda.

Waxaa guuldareysatay rajadii laga qabay in maamulka cusub ee Muqdisho la wareegay sanadkii 2012, kan Puntland ee awoodda la wareegay sanadkii 2014 iyo maamul goboleedyada kumeelgaarka ah ee dhawaan la sameeyay, ay cadaalada la beegsan doonaan tacaddiyada ka dhanka ah weriyayaasha. Dowladda, maamul goboleedyada kumeelgaarka ah iyo Al-Shabaab ayaa dhammaantood isku dayay in ay warbaahinta u adeegsadaan danahooda si ay u bedelaan fekerka dadweynaha ayna usii xoojiyaan awooddooda, taasoo qiimo badan ugu kacday xorriyadda warbaahinta iyo ammaanka weriyayaasha.

Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo mas'uuliyiinta gobolka ayaa waxay xeelado kala duwan u adeegsadeen sidii ay warbaahinta ugu qasbi lahaayeen in ay arrimo muhiim ah u tebiyaan qaabka ay mas'uuliyiintu doonayaan. Waxaa xeeladahaasi ka mid ah xarig iyo in albaabada loo laabo warbaahinta, hanjabaad, cagajugleyn iyo mararka qaar dembi kusoo oogid. Dowladda Federaalka iyo mas'uuliyiinta gobolada ayaa si kumeelgaar ah u xiray 10 warbaahin sanadihii 2014 iyo 2015. Hay'adda sirdoonka iyo laamaha ammaanka ayaa mamnuucay in laga warramo arrimaha qaarkood, sida bayaannada uu soo saaro ururka Al-Shabaab, waxaana ay caburinayeen warbaahinta aan raacin amarradaasi. Sidaa oo ay tahayna, hanjaabadaha, weerarrada iyo weliba dilalka loo geysto weriyayaasha ayaan la baarin oo aan cidna loo maxkamadeyn.

Maamul goboleedyada ku sugan magaalooyinka lagu muransan yahay, sida Baydhabo sanadkii 2014, iyo Dhuusamareeb iyo Guriceel ee bartamaha sanadkii 2015, ayaa si sabab la'aan ah u xiray weriyayaal, waxayna u hanjabeen oo ay xireen shan warbaahin si ay u xakameeyaan tebinta wararka siyaasadda, gaar ahaan arrimaha la xiriira doodda ka taagan nimaadka federaalka iyo sameynta maamulada cusub ee kumeelgaarka ah. Ka dib

xooggaa xasilooni ah, maamulka cusub ee Puntland ayaa xarig kula kacay dhowr weriye, waxaana uu xiray idaacado, isaga oo fal dembiyeed kusoo oogay hal warbaahin.

Al-Shabaab ayaa sii waday hanjabaadaha iyo weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha, waxaana ay ula dhaqantaa sidii iyaga oo ka tirsan dowladda ama ciidammada ajaanibta ah

Weriyayaasha haweenka ah ayaa waxay wajahaan dhibaatooyin dheeraad ah. Waxa ay la daalaa dhacaan xadidaadyo dhanka bulshada iyo dhaqanka ah, takoor ay kala kulmaan ragga dhiggooda ah ee ay wadashaqeeyaan, iyo cagajugleynta Al-Shabaab oo doonaysa in ay si xoog ah ku xakameyso ka qeybgalka haweenka ee arrimaha bulshada.

Saraakiisha dowladda ayaa si joogta ah waxa ay isugu dayaan xadidaad ay ku soo rogaan xorriyadda saxaafadda, iyagoo ku andacoonaya in warbaahintu ay u dhaqmeyso si aan xirfadaysnayn ama in ay jiraan arrimo ku aaddan ammaanka qaranka. Inkastoo ay tahay in mas'uuliyiintu ay ka fekeraan dhibaatada ammaan ee jirta iyo xuquuqda shakhsiga ah, haddana xannibaadaha lagu diiwaangeliyay warbixintan ayaa inta badan muujinaya isku dayga ay mas'uuliyiintu ku xakameeyaan tebinta war sax ah oo ku aaddan arrimo muhiim ah oo la xiriira ammaanka iyo siyaasadda dalka. Xeeladahan ayaa loo adeegsadaa si aan sharci ku dhisnayn, waxaana ay weriyayaasha geliyaan khatar aargoosi.

Dhibaatooyinka loo geysto weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta ee aan la baarin ama aan cidno loo ciqaabin ayaa muujinaya isla xisaabtan la'aanta baahsan iyo xurma la'aanta sharci ee ka jirta Soomaaliya. Waxaa aad u yar baaritaannada iyo dacwadaha maxkamadeed ee ay dowladdu sameyso ee ku aaddan weerarrada ka dhanka ah weriyayaasha. Dowladda ayaa maxkamadeysa oo keliya weerarrada loo geysto weriyayaasha oo ay sheegato ama lagu eedeeyo inay geeysteen ururka Al-Shabaab, iyada oo si xad dhaaf ah ugu tiirsan hay'ada sirdoonka qaranka (NISA), taasoo aanan lahayn awood sharciyeed oo ay howshaas ku fuliso. Baaritaannada weerarrada noocaasi ah waxay ka dhigan yihiin isla xisaabtan hal dhinac ah. Human Rights Watch ayaa ogaatay in tan iyo 2014-kii dilka hal weriye oo keliya dad loo maxkamadeeyay. Kiiskaasi, sida kuwa kale ee dhawaan loo tiiriyay Al-Shabaab, ayaa waxaa qaaday maxkamada ciidanka qalabka sida, taasoo xukunnadeeda aanay gaarsiisneyn heerka caalamiga ah.

Human Rights Watch ayaanan arkin wax caddeyn ah oo muujineysa in saraakiisha dowladda ama xubnaha ciidanka nabad sugidda loo maxkamadeeyay ama loo ciqaabay tacaddiyada ay u geystaan weriyayaasha dhowrkii sano ee lasoo dhaafay.

Maadaama aan inta badan weerarrada la baarin, waxaa qaabab kala duwan looga hadlay heybta cidda fulisa weerarradaasi. Sidoo kale, arrintaasi ayaa cabsi iyo walwal ku reebtay weriyayaasha ka badbaaday weerarradii loo geystay sida Cabdirisaaq oo kale.

Maamule idaacad ku taalla Muqdisho ayaa yiri "Marka la dilo saaxiib shaqo oo aad isu dhawdihiin, waxaad u baqaysaa naftaada. Haddii aadan aqoon cidda dilka geysatay ama waxa ujeedkoodu yahay, cabsidu waa ay sii badaneysaa, maadaama aadan ogaan karin halka ay khatarta kaaga imaaneyso."

Weriyayaasha iyo tifaftirayaasha Soomaaliya ayaa qiray in ay cadaawadda hadda jirta uga jawaabaan in ay faafreebaan wararkooda. Intooda badan waxay iska ilaaliyaan ka warramida arrimaha xasaasiga ah sida dagaallada Al-Shabaab, iska hor-imaadyada beelaha ee siyaasadeysan iyo weliba arrimaha la xiriira hannaanka nidaamka Federaalka. Waxa ay sidaasi u sameynayaan in ay ammaan u helaan naftooda. Weriyayaasha iyo tifaftirayaasha ayaa u sheegay Human Rights Watch in faafreebida wararkooda uu noqday qaabka ay ku badbaadaan. Maamule idaacad ku taalla magaalada Gaalkacyo qeybta Puntland ayaa sidan yiri:

> Haddii cadowgeygu uu ahaan lahaa mid qura, oo aan arki lahaa isla xisaabtan iyo cadaallad ku aaddan dilalalka loo geystay asxaabteyda, ma aanan samayn lahayn wax faafreebid ah…..Balse haatan waxaannu wajahaynaa Al-Shabaab oo ah koox khatar badan, doonaysana in ay fasirto kalmad kasta oo warbaahinta ka baxaysa, iyo mas'uuliyiinta oo sidoo kale doonaya in ay ina caburiyaan halkii ay ina difaaci lahaayeen,"

Dastuurka qabyada ah ee Soomaaliya iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha waxa ay ilaaliyaan xorriyadda hadalka oo ay ka mid tahay warbaahinta. Haseyeeshee dhowr ka mid ah shuruucda qaranka ee Soomaaliya ayaanan waafaqsaneyn waajibaadka

caalamiga ah ee dalka saaran. Bishii Janaayo ee 2016, madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa saxiixay xeer cusub oo saxaafadda ah, kaasoo caqabad dheeri ah ku noqon kara xorriyada hadalka. Inkastoo sharcigan uu leeyahay waxyaabo wanaagsan, haddana waxaa ka mid ah xadidaad ku aaddan warbaahinta, sida xakameynta "dacaayadda ka dhanka ah sharafta muwaadiniinta, shakhsiyaadka ama hay'adaha dowladda." Sharciga cusub ayaa dhalin kara faafreeb dheeraad ah maadaama aanay weriyayaashu go'aansan karin ficillada dembiga ah.

Xeerka ciqaabta ee dalka oo hadda dib u eegid lagu sameynayo, ayaa waxaa ku jira qodobo xorriyadda hadalka ka dhigaya mid dembi ah, sida "u gefida sharafta iyo sumcada hogaamiyaha dalka" iyo "xaqiraadda dalka, dowladda ama calanka"

Mas'uuliyiinta dowladda Federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada waa in ay si cad u ogolaadaan in si shaac baxsan looga hadlo arrimaha shacabka khuseeya oo ay ka midka yihiin arrimaha xaasiga ah ee taabanaya siyaasadda. Sidoo kale, waa in ay si dhab ah u baaraan tacaddiyada lagu eedeeyo ciidankooda ammaanka, sida xariga aan loo meel dayin, xiritaanka warbaahinta iyo hanjaabadaha ka dhanka ah weriyayaasha. Ka hor hannaanka doorashada, mas'uuliyiintu waa in ay dib u eegid ku sameeyaan sharciga cusub ee saxaafadda iyo xeerka ciqaabta, si ay u xaqiijiyaan in dhammaan qodobada ku xusan ay waafaqsan yihiin sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Waa in Al-Shabaab ay si degdeg ah u joojisaa weerarrada iyo hanjabaadaha ka dhanka ah weriyayaasha, ayaga oo aan eegeyn cidda ay taageersan yihiin iyo jinsigoodaba.

Deeq bixiyayaasha caalamiga ah ee ku howlan warbaahinta waa in ay taageeraan dadaalka lagu wanaajinayo ammaanka weriyayaasha, ayna ku cadaadiyaan dowladda in ay dib u eegid ku sameyso shuruucda xadgudubka ku ah xorriyadda warbaahinta, ayna dowladda siiyaan kaalmo farsamo si loo xaqiijiyo dembi baaris qoto dheer, hufan isla markaana ilaalineysa xuquuqda. Taas ayaa gacan ka geysan karta sidii loola xisaabtami lahaa kuwa dila weriyayaasha, ayada oo aan la eegeyn cidda ay ku xiran yihiin.

# Talooyin

## Ku aaddan Madaxweynaha Soomaaliya

- In uu si cad u cambaareeyo dhammaan weerarrada loo geysto weriyayaasha iyo hay'adaha warbaahinta. In uu soo saaro bayaan cad oo ka mamnuucaya dhammaan hay'daha ammaanka ee dowladda fal kasta oo leh cagajugleyn, hanjabaad iyo xarig bilaa sharci ah oo ay u geystaan weriyayaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, asaga oo sheegaya in falalka noocaasi ah si degdeg ah loo baarayo, waxna looga qabanayo ama loo maxkamadeynayo;
- In uu si shaac baxsan u taageero xaqa xorriyadda warbaahinta oo ay ka mid tahay in ay si cad uga warrami karaan arrimaha xasaasiga ah ee siyaasadda iyo kuwa kaleba;
- In uu maxkamadaha rayidka u wareejiyo kiisaska dadka rayidka ah ee ka socda maxkamada ciidanka qalabka sida. In uu ku amro xeer ilaaliyaha maxkamada ciidanka in uu kiisaska dadka rayidka ah ee mustaqbalka si toos ah ugu wareejiyo maxkamadaha rayidka si halkaa loogu qaado;
- In uu si firfircoon u taageero isbeddelka sharci ee ku aaddan sharciga cusub ee saxaafadda, iyo doorka hay'adaha ammaanka ee hoos lagu xusay;
- In uu si degdeg ah u buriyo dhammaan xukunnada dilka ah ee la fulin rabo, si taasi ay u noqoto tallaabada ugu horreysa ee lagu joojinayo dhammaan xukunnada dilka ah; waa in uu baarlamaanka ka codsadaa sameynta sharci mamnuucaya dhammaan xukunnada dilka ah.

## Ku aaddan Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya

- In uu si degdeg ah oo wax ku ool ah dib u eegid ugu sameeyo xeerka ciqaabta, sharciga cusub ee saxaafadda iyo shuruucda kale, si ay ula jaanqaadaan waajibaadka Soomaaliya ee caalamiga ah ee ku aaddan xaqa xorriyada hadalka iyo warbaahinta; waa in uu xaqiijiyaa in xadidaad kasta oo sharciga u geysanayo xorriyada warbaahinta ay tahay mid lagama maarmaan ah, ku haboon, isla markaana aad u xakamysan;
- In uu ansixiyo sharci ku aaddan ammaanka qaranka isla markaana xurmeynaya xuquuqda dadka, sida ku cad dastuurka qabyada ah, sharcigaasi oo caddeynaya awooddaha hay'adaha ammaanka qaranka isla markaana muujinaya in Hay'adda

Nabad Suggida iyo Sirdoonka Qaranka aanay awood u lahayn in ay dad soo xirto ama ay hayso;

- In uu ansixiyo sharciga gudiga qaran ee xuquuqda aadahan, kaasoo lagu sameynayo gudi madax bannaan oo leh awood ballaaran oo uu wax ku fulin karo, isla markaana waafaqsan Mabaadii'da Paris ee Hay'adaha Qaran ee Xuquuqda Aadanaha.

## Ku aaddan wasiirka ammaanka gudaha

- In uu ku amro Hay'adda Nabad Suggida iyo Sirdoonka Qaranka (NISA) iyo hogaanka booliska in ay adeegsadaan dhammaan qaababka jira ee ilaalinta iyo edbinta, si loo xaqiijiyo in NISA iyo askarta booliska ay xurmeeyaan xuquuqda weriyayaasha iyo shaqaalaha warbaahinta;
- In uu xaqiijiyo in NISA ay joojiso xiritaanka aan sharciga ku dhisnayn ee idaacadaha iyo telefishinnada, iyada oo aanay sidaa maxkamad amrin;
- In uu xaqiijiyo in booliska, gaar ahaan Waaxda Dembi Baarista, ay si degdeg ah oo aan eex lahayn u baarto cabashooyinka hanjabaadaha iyo dhibaataynta ee ay soo gudbiyaan weriyayaasha iyo xarumaha warbaahinta;
- In uu edbiyo ama uu sida ku haboon u maxkamadeeyo askarta booliska ama NISA ee ku lugta yeesha tacaddiyada ka dhanka ah weriyayaasha ama aan sida wanaagsan u baarin hanjabaadaha iyo dhibaatooyinka loo geysto weriyayaasha, iyada oo aan loo eegeyn garaadaha askariga;
- In uu xaqiijiyo in ciidammada ku lugta leh sugida ammaanka ay si wanaagsan u tababaran yihiin, gaar ahaan arrimaha khuseeya xorriyadda warbaahinta.

## Ku aaddan wasiirka cadaallada

- In uu joojiyo xariga loo geysto weriyayaasha iyo shaqaalaha warbaahinta, iyo xiritaanka idaacadaha iyo telefishinnada iyada oo aan amar maxkamadeed loo haysan.

## Ku aaddan wasiirka warfaafinta

- In uu si degdeg ah dib u eegid ugu sameeyo sharciga saxaafadda uuna bedelo qodob kasta oo meel ka dhac ku ah xorriyadda hadalka, iyo in uu xaqiijiyo in xadidaad kasta oo sharciga u geysanayo xorriyada warbaahinta ay tahay mid lagama maarmaan ah, ku haboon, isla markaana aad u xakamysan;
- In uu xaqiijiyo in hannaanka nidaaminta sharci uu yahay mid madax bannaan isla markaana hormarinaya in warbaahinta iyadu is-nidaamiso;
- In uu xaqiijiyo in magacaabida Gudiga Saxaafadda Soomaaliya ay si madax bannaan u dhacdo, iyada oo wax laga bedelayo sharciga hadda, si dowladda aanay uga qeyb qaadan hannaanka magacaabida ama aanay si khaldan ugu faragelin howlaha gudigaasi;
- In uu taageero ka raadsado deeq bixiyayaasha si dadweynaha loogu baraarujiyo xorriyadda hadalka oo ay ka midka tahay doorka warbaahinta.

## Ku aaddan Puntland, maamul goboleedyada kumeelgaarka ah iyo Ahlu Sunna Waljamaaca

- In ay si shaac baxsan u taageeraan xaqa xorriyadda warbaahinta oo ay ka mid tahay in ay si cad uga warrami karaan arrimaha xasaasiga ah ee siyaasadda iyo kuwa kaleba;
- In ay xaqiijiyaan in ciidammadooda ammaanka ay si degdeg ah oo aan eex lahayn u baaraan cabashooyinka hanjabaadaha iyo dhibaataynta ee ay soo gudbiyaan weriyayaasha iyo xarumaha warbaahinta;
- In ay xaqiijiyaan in mas'uuliyiintooda ama saraakiishooda ammaanka ee lagu helo in ay mas'uul ka yihiin tacaddiyo ama weerarro loo geystay weriyayaasha ama xarumaha warbaahinta la mariyo ciqaabta ay mudan yihiin ama la maxkamadeeyo;
- In ay joojiyaan xariga bilaa sharciga ah ee loo geysto weriyayaasha, shaqaalaha warbaahinta, xiritaanka idaacadaha iyo telefishinnada;
- Puntland waa in ay degdeg ah dib u eegid ugu samaysaa sharciga saxaafadda ayna bedeshaa qodob kasta oo meel ka dhac ku ah xorriyadda hadalka, iyo in ay xaqiijiso in xadidaad kasta oo sharciga u geysanayo xorriyada warbaahinta ay tahay mid lagama maarmaan ah, ku habboon, isla markaana aad u xakamysan.

## Ku aaddan Deeq bixiyayaasha caalamiga ah, oo ay midka yihiin xubnaha Kooxda Taageerida Warbaahinta Soomaaliya (SMSG)

- In si cad ay walaac uga muujiyaan tacaddiyada ku aaddan xorriyada hadalka, ayna ugu baaqaan dowladda Soomaaliya in ay si shaac baxsan ugu baaqdo ciidammadeeda ammaanka in aanay u hanjabin ama aanay khatar gelin weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, gaar ahaan xilligan loo diyaar garoobayo doorashada 2016-ka;
- In si cad ay dowladda Soomaaliya ugu cadaadiyaan isbedel ku sameynta shuruucdeeda iyo hay'adeeha nidaaminta sharciga, si ay ula jaanqaadaan mas'uuliyadda Soomaaliya ka saaran xuquuqda aadanaha; waa in ay dowladda Soomaaliya siiyaan kaalmo farsamo si ay u sameyso dadaaladaas;
- In ay taageeraan sidii ay tababar ku haboon u heli lahaayeen ciidammada ammaanka iyo saraakiisha garsoorka, kaasoo ku aaddan xorriyadda hadalka iyo warbaahinta;
- In ay farsamo khibradeed ku taageeraan Waaxda Dembi Baarista Soomaaliya, si ay u sameyso baaritaanno qoto dheer, hufan isla markaana ilaalinaya xuquuqda;
- In ay taageeraan dadaallada lagu hubinayo in maxkamada ciidanka ay xaqiijiso in ay u shaqeyso qaab waafaqsan heerka caalamiga ah ee hannaanka garsoorka cadaallada ku dhisan;
- In ay taageeraan ururada bulshada ee maxalliga ah, oo ay ka midka yihiin kuwa taageera warbaahinta, si ay u sameeyaan la socosho joogta ah, ayna u diiwaangeliyaan tacaddiyada ka dhanka ah xorriyadda hadalka ee ka dhaca dalka oo dhan;
- In ay sare u qaadaan taageeridda weriyayaasha ku suga qeybaha kala duwan ee dalka ee u baahan kaalmada sharci, caafimaad iyo maskaxeed, iyaga oo usii maraya hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee taageera warbaahinta.

## Ku aaddan Hay’adda Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka ee Qaramada Midoobay (UNESCO)

- In ay sii wado tababarada ku aaddan xorriyadda warbaahinta ee ay siiso xubnaha hay’adaha ammaanka iyo saraakiisha garsoorka ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo weliba Puntland.

## Ku aaddan Waaxda Arrimaha Siyaasadda iyo Xafiiska Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay (OHCHR)

- In ay xaqiijiyaan in Xafiiska Xuquuqda Aadanaha Qaramada Midoobay ee ka tirsan Howlgalka Qaramada Midoobay ee Caawinta Soomaaliya (UNSOM) uu helo dhaqaale iyo shaqaale ku filan, si uu u kordhiyo awoodda uu u leeyahay dusha kala socoshada xuquuqda aadanaha;
- Xaqiijinta in qeybta xuquuqda aadanaha u qaabilsan UNSOM ay si joogta ah oo shaac baxsan uga warranto xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.

## Ku aaddan Al-Shabaab iyo kooxaha xiriirka la leh

- In ay joojiyaan dhammaan weerarrada iyo hanjabaadaha ka dhanka ah dadka rayidka oo ay ka midka yihiin weriyayaasha, shaqaalaha kale ee warbaahinta iyo xarumaha warbaahinta, gaar ahaan kuwa xiriirka la leh dowladda.

## Ku aaddan Ururada Weriyayaasha Soomaaliya

- Xaqiijinta in hannaanka lagu diyaarinayo nidaamka iyo anshaxa hagaya weriyayaasha iyo ururada warbaahinta uu yahay mid loo sameeyay qaab hufan oo madax bannaan;
- Hormarinta in si ikhtiyaar ah loo daabaco saxitaanka lagu sameeyay bayaannada ama wdararka aan saxda ahayn ama aan dhex-dhexaadka ahayn;
- Dusha kala socoshada tacaddiyada ka dhanka ah weriyayaasha ee ka dhaca deegaannada ka baxsan Muqdisho iyo magaalooyinka waaweyn ee Puntland;

- Dhiirigelinta in dowladda Federaalka iyo maamul goboleedyada ay sameeyaan baaritaanno qoto dheer, hufan, oo wax ku ool ah, kuwaasoo ku aaddan tacaddiyada ay la kulmaan weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.



Soomaaliya waa mid ka mid ah wadamada ugu khatarta badan ee ay ka howlagalaan wariyeyaasha. Waxa ay dhibaato iyo hanjabaado kala kulmaan dhammaan dhinacyada isku haya colaadda dabada dheeraatay ee dalka. Labadii sano ee lasoo dhaafay, dowladda cusub ee Federaalka iyo maamullada la wareegay dowlad goboleedyada ayaanan uga rayn xaaladda weriyayaasha Soomaaliya.

*"Sida Kalluun ku jira Biyo Sumeysan"*, waa warbixin ku salaysan in ka badan 50 wareysi oo lala yeeshay weriyayaal ka howlgala koofurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo Puntland, waxaana lagu eegayaa weerarrada ka dhanka ah xorriyada warbaahinta ee dhacay tan iyo 2014-tii iyo sida ay dowladda ugu guuldareysatay in ay baaritaan ku filan iyo maxkamadeyn ku qaado kuwa weerarradaasi ka dambeeyay.

Warbixinta ayaa lagu ogaaday in weriyayaasha ay wajahayaan dilal iyo weerarro oo ay ka mid yihiin kuwa uga yimaadda kooxda hubaysan ee Al-Shabaab, caburin iyo faafreebid ay kala kulmaan ciidammada ammaanka iyo saraakiisha dowladda. Waxay sidoo kale diiwaangelisay caqabadaha ay warbaahintu kala kulanto maamul goboleedyada cusub ee kumeelgaarka ah iyo Puntland. Iyadoo Soomaaliya ay isu diyaarineyso hannaanka doorashada ee dhammaadka sanadka 2016-ka, ayaa weerarradu waxay wiiqayaan xaqa ay shacabka Soomaaliya u leeyihiin helitaanka warar sugan, maadaama ay wariyeyaashu faafreebaan wararkooda si ay u badbaadaan.

Human Rights Watch ayaa ugu baaqaysa mas'uuliyiinta Soomaaliya in ay si buuxda u ogolaadaan in si shaac baxsan looga warramo arrimaha khuseeya danaha shacabka, ay xakameeyaan ciidammada ammaanka ee xadgudba, ayna ka baaraan-dagaan isbedel lagu sameeyo sharciga cusub ee safaaxadda Soomaaliya. Mas'uuliyiinta Soomaaliya waa in ay waxbadan ka qabtaan sidii loo xaqiijin lahaa in baaritaanno iyo isla xisaabtan lagu sameeyo tacaddiyada ka dhanka ah weriyayaasha. Human Rights Watch waxay sidoo kale ugu baaqaysaa Al-Shabaab in ay si degdeg ah u joojiso weerarrada iyo hanjabaadaha ka dhanka ah warbaahinta.

*(BOGGA DAMBE) Ehelada iyo weriyeyaasha ay saaxiibadda ahaayeen ayaa ku tukanaya meydka weriye Yuusuf Keynaan oo la aasay 21-kii Juun 2014-ka. Weriye Yuusuf Keynan ayaa Muqdisho ku dhintay ka dib markii ay ku qaraxday bambo la rumeysan yahay in loogu xiray gaarigiisa, laguna qarxiyay.*

*© Xuquuqda sawirka waxaa leh Getty Images/Maxamed Cabdiwahaab 2012*

*(BOGGA HORE) Weriye sawir-qaade Soomaali ah ayaa gabbaad dayanaya xilli uu sawirro ka qaadayay dagaal u dhexeeyay ciidanka dowladda Soomaaliya iyo kuwa AMISOM oo isku dhinac ah iyo dagaalyahannada Al-Shabaab. Dagaalka ayaa bishii Abriil 2012 ka dhacay deegaan ka tirsan gobolka Shabeellaha hoose.*

*© Xuquuqda sawirka waxaa leh Maxamed Cabdiwahaab 2012*

**hrw.org**